

# Hadda ardayda ku dhigata fogaanta dugsiga sare waxa ay dalban karaan cunto.

Dhammaan ardayda wax ka barata dugsiga sare ee Ålleberg ee Falköping kuna dhigata fogaanta waxaa la siinayaa fursad ah in ka billaabata Jimcaha 21ka agosto, in ay maalmaha waxbarashada ay ku dhiganayaan fogaanta ay si maalinle ah qado kulul uga dalbadaan iskuulada degmada midki ay doonaan.

Maqaayadda cuntada dugsiga sare ee Ålleberg waxa ay u furan tahay ardayda wax ku baranaysa iskuulka.

## Dalabka

Dalabka waxaa loo samaynayaa hormaris, ugu dambays sc: 12:00 maalinka ka horreeya qaadashada qadada.

**Waa in aad dalabka samaysaa maalin kasta ee aad qadada qaadanaysid.**

Dalabka waxaa lagu samaynayaa dhanka kombuyuutarka waa in aad haysataana BankID. Haddii aad ka yartahay 18 jir waxaa dalabka samaynaya waalidkaaga. Haddii aad waalid u tahay in ka daban hal arday waxaad dalabka u samaynaysaa arday walba.

Haddii aad cunto gaar ah doonaysid ku dar dalabka khadka.

## Halka laga bixinayo iyo waqtiga.

Qadada waxaa laga heli karaa maalin kasta ee iskuul jiro, mid kamida iskuulladaan: Vartoftaskolan, Åsle skola, Åsarpsskolan, Kinnarpsskolan, Broddetorpsskolan, Gudhemsskolan, Floby skola, Gustaf Dalénskolan, Vindängens skola, Centralskolan eller Ållebergsgymnasiet.

Cuntadu waa ay kulushahay waana isku mid iskuul walba qadada la bixinayo.

Bixinta qadadu waa inta u dhexaysa 11.00 – 13.00 maalin kasta ee iskuul jiro waxaana laga qaadanayaa kushiinka iskuulka la dalbaday in laga qaato. Hore u soo qaado boorso ama bac aad qadada ku qaadatid. Ogow waa ay kulushahaye.

Waa in aad caafimaad qabtaa si aad qadada u soo qaadatid. Ma qabtaa qandho, qufac, neef qabatoow, ama calaamadu fudud sida dhuun xanuun, diif, lalabbo, madax xanuun, murqaha iyo kala goysyada oo ku xanuuna. Haddaba ma imaan kartid si aad qadada u qaadatid. Qof kale ka codso in uu kuu soo qaado.

Marka aad qada qaadaynaysid waxaa kugu filan in aad magacaaga sheegtid. Haddii aad u qadis dad kale waxaa sheegtaa magacyadooda dadkaas.

## Ka fikir

- Ka fikir kala fogaanta haddii ay saf tahay.
- Ka fikir cunta xoolaad, dalbo cuntada aad adigu qaadanaysid si aad u cuntid.

-----